

195_Testitulokset_28_8-1
SOMALI

Maxaa la sameynayaa baaritaanka fayruska Korona kaddib?

Qaadis laga yaabo in aad qaadday cudurka fayruska Korona darteed ayaa lagaaga qaaday saamiga COVID-19, yacni baaritaanka fayruska Korona Saamiga waxaa laga baarayaa in aad qabto cudurka fayruska Korona.

Joog guriga illaa iyo inta natiijada laga xaqiijinayo

Helitaanka natiijada baaritaanku waxay qaadan kartaa dhowr maalmood.

Si dadka kale loo ilaaliyo waa in aad guriga joogtaa ugu yaraan inta natiijada baaritaanka laga xaqiijinayo. Tusaale ahaan ma ahan wax wanaagsan in aad tagtaa dukaanka ama farmashiyaha.

Haddii ay kugu adagtahay in aad hesho cid kaa caawisa ama kuu aadda adeegga farmashiyaha ama dukaanka, fadlan u sheeg xirfadlayaasha adeegyada sooshalka iyo caafimaadka. Caawimaad ayaan kuu qabanqaabin karnaa.

Haddii natiijada baaritaanku tahay boositiif yacni aad qabto cudurka fayruska Korona

Lambar qarsoon ayaa **lagaa soo wacayaa**. Natiijada waxaan soo sheegnaa xittaa habeenki iyo dhammaadka todobaadyada. Khadka telefoonka ayaa laguugu siinayaa hagitaanno rasmi ah.

Wargelinta natiijada kaddib ayaa lagaala soo xiriirayaa arrimaha ku saabsan go'aanka karaantiilka iyo gooni u haynta iyo weliba raadgoobidda cudurka.

Waxaan kaa codsanaynaa in aad dhanka dambe ee foomkan ku qorto macluumaadka loogu baahanyahay raadgoobidda cudurkan iyo in aad foomkaan haysato. Macluumaadka oo horay loo sii diyaariyo wuxuu dedejinayaa raadgoobidda cudurka.

Haddii natiijada baaritaanku ay tahay negatiif yacni haddii aan lagaa helin cudurka fayruska Korona

Waxaa heleysaa farriin qoraal ah, oo ay ku qorantahay "Natiijada baaritaankaadi waa caadi (negatiif)". Si kastaba ha ahaatee, waa muhiim in aad ku sii jirto xaalad karaantiil oo kale illaa iyo inta aad leedahay calaamadaha cudurku. Cunuggu wuxuu xannaano-maalmeedka ku laaban karaa marka ay calaamadaha cudurku si fiican uga raystaan.

195_Testitulokset_28_8-1
SOMALI

Haddii calaamado kaa soo baxay inti aad karaantiilka ku jirtay dartood lagaaga qaaday saamiga baaritaanka, natiijada caadiga ah ee baaritaanku ma burinayso go'aanki hore ee karaantiilka, yacni waa in aad guriga joogtaa illaa uu karaantiilku ka dhammaanayo.

Fadlan xaqiiji, in lambarka telefoonkaada ee shaqaynaya uu ku jiro cinwaankaasiointi.hel.fi, barta Adeegyada caafimaadka Macluumaadka qofka ee daryeelka caafimaadka.

Haddii caafimaadkaadu sii xumaado aadna u aragto in aadan guriga sii joogi karin

Wac maalmaha maalin kasta 8-18 saac rugta talabixinta fayruska Korona ee Helsinki, tel. 09 310 10024 wakhtiyada kalana wac caawimaadda heeganka, tel. 116 117. Marka ay jirto xaalad nafta halis ku ah, wac lambarka gurmada degdegga ah 112.

Goormee ayeey calaamaduhu kugu billowdeen (taariikhda, wakhtiga saacadda):

Miyaad xusuusantahay goob ama xiriir taabasho oo laga yaabo in aad cudurka ka qaadday (kulan ka badan 15 daqiiqo oo la isu jiray masafo kayar 2 mitir)? Ka feker labadii todobaad ee ugu dambeysay kahor inti aysan calaamaduhu billaaban.

Waa kuwee dadka aad xiriir taabasho oo dhow la laheyd muddada afar iyo labaatanka saac (24h) ah ee ka horraysay inti aysan calaamadaha cudurku kugu billaaban, illaa iyo wakhtigan hadda la joogo (kulan socday wax ka badan 15 daqiiqo oo la isu jiray masafo kayar 2 mitir)?

195_Testitulokset_28_8-1
SOMALI

Miyaad shaqaynaysay? Waa maxay xirfaddaaada iyo goobtaada shaqadu?

Macluumaad dheeraad ah www.hel.fi/koronavirus, www.thl.fi